

Su'aalaha caadiga ah ee kireystayaasha ay ka qabaan xannuunka Corona

Milkiilaha ama dayactiraha guriga ayaa rabo inuu soo galo gurigeyga-qasab miyaa inaan u fasaxo?

- Haa, sida sharcigu dhigaayo waa kugu waajib inaa u fasaxdo.
- Haddii aad aad uga welweleysid in xanuunka lagu qaadsiiyo, weydii milkiilaha inay suurtoagal tahay in waqtiga dib loo dhigi karo-waa haddii aysan jirin arrin deg deg ah ama dhaawac .
- Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu xanuunsanyahay waa inaa soo sheegtaa, si markale ballan laguugu sameeyo.

Maxaan sameynaayaa haddii lacagta aan haysto aysan ku filnay inaa ijaarka ku bixiyo?

- Krada waa inaa ku bixisaa waqtigeeda. Haddii aadan sidaas sameynin waxaa dhaceysa in guriga lagaa saaro.
- Haddii aad dareento in lacagta aad haysato ku filnayn inaa kirada ku bixisid waa in aad la hadashaa shirkada guriga iskaleh oo u sharaxdaa xaaladaada.
- Waxaan waraaqo u kala dirnay shirkadaha guryaha iskaleh oo waddanka oo dhan waxaana ka codsanay inay fiiro gaar ah u yeeshaan in kireystayaashu ay xilligaan qabi karaan dhibaato dhaqaale aysan bixin karin kirada. Laakiin milkiilayaasha guryaha ayagaa go'aanka iskaleh siday wax ka yeelaayaan. Sidaa daraadeed waxaa muhiim ah inaa la xiriirtid shirkada aad guriga ka deggantahay haddii lacagta ay kugu yartahay oo kirada aysan kuu gaareynin.

Ma isticmaali karaa qasaalada iyo meelaha kale ee ay dadku wada isticmaalaan?

- Haa. Ma jiraan talooyin kale oo ku saabsan qasaalada ama meelaha kale ee dadka wada isticmaalaan. Sida caadiga ah, waxaa muhiim ah in gacmaha saabun lagu dhaqo ama la mariyo allkolada gacmaha.
- Shirkadda guryaha iskaleh nidaam iyo xeer la raaco waa u sameyn karaan laakiin makaa mamnuuci karaan inaa isticmaashid qasaalada ama meelaha kale ee dadka wadaagaan ayadoo laga baqaayo in cudurku faafo.
- Haddi shirkada ay xirato qasaalada si loo yareeyo qatarta faafitaanka cudurka, waxaad xaq u leedahay in lagaa dhimo kirada. Haddii aad xubin ka tahay ururka kireysteyaasha waxaad la soo xiriiri kartaa mid ka mid ah la taliyeyaasheena si lagu caawiyo waxaad soo waceysaa nambarka telefoonkeena oo ah **0771-443 443**.
- Haddii aad ka tirsantahay dadka xanuunka looga baqaayo oo halista kku yahay ama aad xanuunsantahay oo aadan tegi karin qasaalada xaq uma lihid in kirada lagaa dhimo.

Deriskeyga ma i caawin karaan ama ma caawin karaa ayaga?

- Waa wax aad u wanaagsan in midkeen midka kale caawiyo. Bogga www.godagrannar.nu ayaad iska diiwaangelinkartaa haddii aad caawinaad u baahantahay ama aad rabtid in dadka kale aad caawiso. Anagoo ah ururka kireysteyaasha waxaan isku deyi doonaa inaan dadka isu keeno si sida ugu fiican oo ay ku suurtoogelikarto aan u helno caawinaad maalin walbo ah sida in cunto qofka loo soo iibiyo.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida aan u maareyneyno dhibaatooyinka Corona waxaad ka heli kartaa www.hyresgastforening.se/corona. Haddii aad xubin ka tahay ururka kireystayaasha wa ana soo wici kartaa si talo laguugu siiyo. Waxaad soo wici kartaa telefoonka nambarkiisu yahay **0771-443 443**. Waqtiga sugitaanka waa ka dheeraan karaa sidii hore oo caadada ahayd, sababtoo ah waxaa dhici karta inay dad badan na soo wacaayaan.

Halkaan waxaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan caabuqa Corona/Covid 19 iyo siduu u faafo oo luqadaada ku qoran:

www.folkhalsomyndigheten.se

www.1177.se